

# Wargeyska Mountain View

## Maarso 9, 2016

**Jimcaha, Maarso 11.....Bandhigga Dheesha Darajada Kowaad, “Naxariista”  
Isniin, Maarso 21 - Jimco, Maarso 25.....Ma Jiro Dugsi, Fasaxa Guga (Spring Break)**

### **Fariinta Agaasimaha**

Ma la socotay in aan qabno arday barataa xirfadaha muusikada ee ka socda Dugsiga Muusiikada Hibada Salt Lake City? Dugsiga Hibada Muusikada waa mid ka mid ah kuwa sharaakada la ah Dugsiga Hoose Mountain View. Waxay fasalada muusikada siiyaan dhamaan ardayda ku jirta xanaanada. Waxaa qabnaa kooxda ardayda darajada kowaad ee barta sida loo cayaaro fioliinka taasoo ah lacag la'aan iyo hoos timaada labo tababareyaal oo si la yaab leh u yaqaan fioliinka. Waxaa kaloo nasiib wanaag noo ah in Orkestarada Muusikada Hibada ay barnaamij u dhigtay dugsigena todobadkii la soo dhaafay. Mountain View wuxuu u mahad celinaa macalimiinta iyo ardayda Dugsiga Muusiikada Hibada sida ay ula qeybsadeen aqoontooda iyo sida ay ugu kaalmeyeen ardaydena in ay koraan.

### **Waalidiinta iyo Macmacaanka**

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Abriil 12, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### **Quraacda Fasalka**

Dugsiga Hoose Mountain View wuxuu ku hawlan yahay baddalaadda sida aan u bilowno maalintena. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqno in laga bilaabo Abriil 1, dhamaan ardaydena la siin doono quraac lacag la'aan ah. Gambaleelka kowaad wuxuu dhici doonaa 7:55, hase ahaatee ardayda waxay soo geli doonaan safka si ay u qaataan quraacda ay u qaadan karaan gudaha fasalka si ay ula cunaan asxaabtooda. Ardayda waxay soo gabogabeyn doonaan cunidda quraacda fasalka ugu dambayn 8:10, marka ay iska tuuraan waxa soo hara, kaddibna xoogga saaraan shaqada fasalka. Waalidiinta waxaa la weydiin doonaa in ay u ogolaadaan ardaydooda in ay quraacda la tagaan gudaha fasalka iyadoo aysan la joogin waalid ama walaalaha ka weyn, si ay u dhisaan bulshada fasalka una kordhiyaan heerka madaxbanaanidooda. Dabcan, haddii waalidiinta rabaan in ay ku shaqeyaan iskaa wax u qabso, waxay iska xaadiri karaan xafiiska, kaddibna waxay halkaas ka heli karaan warqadda (sticker) iskaa wax u qabso. Macluumaad badan oo ku saabsan qorshaha Quraacda Fasalka ayaad heli doontaa goor dhaw.

### **Wax Ku Barashada Gudaha Beerta**

Liz Pedersen oo ka socota Wasatch Gardens ayaa la shaqeyn doonto ardaydena si ay u barto xirfadaha beerta. Waxay tagi doonaan dibadda beerta si ay u abuuraan cagaar, salaato, iyo baggal, la soo goyn doono todobaadka May 9. Mahadsanid, Liz iyo Wasatch Gardens, in aad na bartaan sayniska iyo farxadda beerta.